



**JUMHURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA**

GOLAHADHADHKA

QARAAR KU SAABSAN

**ANSIXINTA R/WASAARAHA XUKUUMADDA
FEDERAALKA SOOMAALIYA
M.NE XASAN CALI KHEYRE**

A handwritten signature in black ink, appearing to read "M. Ne Xasan Cali Kheyre".

Muqdisho, 1^{da} Maarsa 2017

GOLAH SHACABKA SOOMAALIYA

- Markuu Arkey:** Qodobka 69-aad faqradiisa (2) (d) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya;
- Markuu Arkey:** Xeer Madaxweyne Lr. 005 ee 23/02/2017 ee ku saabsan Magacaabid R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;
- Markuu Arkay:** Soojeedinta Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Lam. MJFS/Note 001GGSH/2/17 kuna taariikhsan 28/2/2017 oo Golaha soo gaartay 28/2/2017 kuna saabsan Soo Gudbin Magacaabis R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;
- Markuu Dhageysatay:** Hadaljeedinta iyo codsiga Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Goluhu u jeediye Kalfadhiga 1-aad Kulankiisa 1-aad aan caadiga ahayn ee 01/03/2017;
- Markuu Dhageysatay:** Hadaljeedinta iyo Barnaamijka Xukuumadda oo kooban ee Ra'iisal Wasaaraha magacaaban M.ne Xasan Cali Kheyre;

Wuxuu Xeeriyeey Qodobbadan:

Qodobka 1-aad:

Iyadoo ay goobgooj yihiin 231 (Laba Boqol Sodon iyo Kow) Xildhibaan oo codeenaya, Golaha Shacabka Soomaaliyeed wuxuu Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya M.ne Xasan Cali Kheyre kalsooni ku siiyey aqlabiyyad 231 (Laba Boqol Sodon iyo Kow) Xildhibaan oo "oggol" ah ma jirin xildhibaan diiday ama ka aamusay.

Qodobka 2-aad:

R/Wasaaraha cusub waxaa laga doonaya in xubnaha Golaha Wasiirada Federaalka iyo Barnaamijka Xukuumadda oo faahfaahsan Golaha Shacabka ku horkeeno ugu dambeyn 31^{ka} Maars 2017.

Qodobka 3-aad:

Qaraarkani wuxuuna hirgelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaat"

Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

